



Ilaahay wuxuu jecel yahay in lala yimaado ruqsooyinkiisa sida uu u jecel yahay in lala yimaado waajibaadkiisa

Ibnu Cabbaas Allaha ka raali noqdo isagiyo Aabihise waxaa laga wariyey inuu yiri: Rasuulkii Ilaahay nabadjelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu yiri: Ilaahay wuxuu jecel yahay in lala yimaado ruqsooyinkiisa sida uu u jecel yahay in lala yimaado waajibaadkiisa.

[Xadiis Saxiix ah] [Waxaa wariyey Ibnu Xibbaan]

Nabigu nabadjelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu sheegay: in Ilaahay jecel yahay in la qaato ruqsooyinkiisa sharciga ah, sida khafiifinta axkaanta iyo cibaadada iyo in qofkii qaan gaar ah ee cudur daar leh loo sahlo cibaadada sida gaabinta Salaada iyo jamcinteeda Sida Ilaahay u jecel yahay in lala yimaado waajibaadka uu waajibiyey, waayo amarka Ilaahay ee ruqsada ah iyo waajibaadku waa hal mid.

<https://sunnah.global/hadeeth/so/show/65017>

